


Qadimaadda Bugga waxaa qoray, Dr. Said Fahia, Phd., Minneapolis, Minnesota.

Amaanta akhristayaashu ka qoreen
HIMILADAADA HANO

"Dhibaatooyinka ummadda Soomaaliyeed loo aaneeyo inay nolosheeda si ba'an u aafeeyeen, tan ugu darani waa abaarta iyo arradka maskaxda ka cuskaday. Wahabkaas sidii looga dul qaadi lahaa qofka Soomaaliyeed ee tabaalaysan, ka dibna uu isu heli lahaa, xilkiisana u gudan lahaa, ayaa ah baahida ugu weyn ee ummaddan wada haysata. Buuggan *"HIMILADAADA HANO*" ee Maxamed Ismaaciil Maxamed soo-ifbixintiisa safarka dheer u soo maray, aqoon iyo awood uu hantona hagar li'i dul dhigay, casharrada ku duugan ayaa kaalin aan waxtarkeeda la qiimayn karayn ka geysanaya. Ku darso oo buuggani Af-Somaali huffan, sahlan, oo hab iyo hannaan aan lagu daalin lagana daalin u qaabaysan, ayuu ku qoran yahay. Meel ay joogtoba, gudcur-diidka , mugdigu daashaday ee iftiinka aqoonta u oommani, waa buug ay ku soo hirtaan."

- Siciid Jaamac Xuseen, "Qoraaga SJX"

"Buuggan waxaan u arkaa in uu yahay buug aad loogu bahnaa in la qoro, waqti ku habbonna la soo saaray. Runtii buuggani aad ayuu u anfacayaa Soomalida, gaar ahaan, dadka wax qabadkoodu sareeyo (high achievrs) amaba qofka raba in uu hawasha uu qabanayo ay miro fiican dhasho. Si talabo talabo ah ayuu u qeexayaa waxa qofku u baahan yahay in uu sameeyo si uu u gaaro himilada uu hiigsanayo."

- Dr. Hodan S. Isse, professor of economics and finance at University at Buffalo.

"Buuggan *Himiladaada Hano* oo uu Maxamed Ismaaciil Maxamed soo curiyay waa buug qofkii akhrista wax weyn u taraaya aqoontiisana sare u qaadaya. Waxaan jeclaystay sida uu biyaan uga dhigay sida qofku marka hore himiladiisa u garan lahaa ka dibna u gaari lahaa. Tan kale,

Ninna Maankiisa Ma Saluugo, oo tuseeysa jiilka soo koraaya sideey aad ugaga fakiri lahaayeen mustaqbilkooda iyagoo ka faa'ideysanaaya daraasadda iyo xigmadda ku qoran buggan, gaar ahaanna daraasadda laga sameeyay dadka da' doodu 90 sano kor u dhaaftay. Isku soo duub, buuggani waa buug uu qof walba oo af Soomaali akhriyi karaa uu u baahan yahay."

- Maxamed A. Haji-Husein, MA.
Guddoomiyaha Jaaliyadda Banaadiri ee USA

"Macluumaadka ama xogta uu buuggan *HIMILADAADA HANO* xanbaarsan yahay waxa ay si wayn u kobcin karaan shaqsi-nololeedka qof walba oo akhrista kuna wax qaata. Nuxrurku waa boorigalin, kalsooni abuurid, yiddidiilo nololeed iyo waliba xusuusin in aad adiga noloshaada masuul ka tahay. Waxan ku xoorinayaa waa ka faa'iidayso maskaxda iyo caqliga uu Eebbe kugu manaystay."

- Raho Warsame
Property Manager, Project For Pride In Living Inc.

"Waa buug kooban oo mugweyn. Akhristuhu wuxuu heli tilmaamo naftiisa wax ka badala oo u horseeda isku-kalsooni, go'aan qaadasho, iyo yididiilo. Waxaan rajayn inuu natiijo fiican gaadhsiinayo ruuxa ku camal fala."

-Cabdisalaam Sharif Aadam , Guddoomiyaha
Masjidka Daar Al-Hijrah, Minneapolis.

"Buuggani talooyin wax tar leh ayuu u sidaa dadka Af Soomaaliga yaqaan (akhriya), waxaana mudan in ay akhriyaan *"Himiladaada Hano",* si ay uga faa'iideystaan."

- Maxamed Xasan Cusmaan, MA.
Former Dean of Lafoole

"Himiladaada Hano" oo uu qoray Maxamed Ismaaciil Maxamed mudan in la akhriyo, haboon in lagu daydo

tusaalahiisa, wacan in la raaco talooyinkiisa. Waayo, waa buug ku habboon qof kasta ee doonaya inuu horumariyo mustaqbalkiisa isagoo siinayaa qofka aqoon iyo astaamo uu ku hago noloshiisa aqooneed, shaqo iyo bulsho. Buuggu waa miid laga soo ururiyay waaya aragnimadii uu aadanuhu ka dhaxlay nolosha, sidoo kale xeerarkii iyo qawaaniintii uu Ilaahay(swt) u dajiyay dunida. Waxaad ka heleysaa tusaalooyin laga soo miinguuriyay waya aragnimadii uu aadanuhu nolosha ka kasbaday kuwaas oo kuu noqon kara tilmaamo ku haga."

- Prof. Cabdirisaaq Hirad Maxamed
Guddoomiyaha Jaamacadda Bariga Afrika

"Buuggani wuxu hiil u yahay de' yarta soo kacaysa, iyo in badan oo bulshada Soomaalyeed ka mid ah ee aaminay mabd'a ah hurda-ku-dhereg; wuxuna iftiin u yahay inta rabta horumar, iyo is beddel nololeed. Nuxurka buuggani xambaarsan yahay, iyo af Soomaaliga quruxda badan ee qoraagu ku xiddeyey ayaa buuggan ka dhigaya mid leh qiima sare."

Haybe Cabdi Cismaan, MSc.
Co-Founder of Somali Policy Institute

Qoraaga:

Maxamed Ismaaciil Maxamed waa qoraa siminaaro badan ka qabtay *aqoonta qofku naftiisa ku horumariyo.* Xigmadda nolosha adduunka oo uu xoogteeda ka dhaxlay jiilkii ka horeeyay waxaa u dheer in uu muddo bare iyo la-taliye u ahaa dhalinyaro iyo dad waaweyn oo mustaqbal dhisaaya. Wuxuu muddo ahaa ganacsade ka dhexeeyay faa'iido iyo khasaare. Maxamed wuxuu jaamacadda kowaad ku dhamaystay Poona University (B. Com.); midda labaadna King's College London (MSc.).